


JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
<b>FAAFINTA RASMIGA AH</b>		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند	
<b>XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA</b> <i>E-mail: Faafintagaryaqaanka@gmail.com</i>		
Sanadka: 6aad	Cadadka: 9aad ee September	Taariikh: 07/10/2017
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
<i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.</i>		

**TUSMADA CADADKA**

<b>QAYBTA KOWAAD:</b> XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANIYADDA QARANKA:		
1)	SOOMA BIXIN	
<b>QAYBTA LABAAD:</b> XEER MADAXWEYNE:		
2)	<u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0848/092017 Beddel	419
3)	<u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0849/092017 Beddel	420
4)	<u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0850/092017 Beddel	421
5)	<u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0851/092017 Beddel	422
6)	<u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0839/092017 Cafis Madaxweyne	424
7)	<u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0853/092017 Magacaabid	425
8)	<u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0854/092017 Magacaabid Degmo	426

9) <b><u>XEER MADAXWEYNE</u></b> Lr: 0855/092017 Magacaabid Degmo	427
10) <b><u>Wareegto MADAXWEYNE</u></b> Gacan Siin Komishanka Doorashooyinka Qaranka	428
11) <b><u>Wareegto MADAXWEYNE</u></b> Isticmaalka Warbaahinta Dawladda iyo Fagaarayaasha Wakhtiga Ololaha Doorashada	430
12) <b><u>Wareegto MADAXWEYNE</u></b> Reebbanaanta U Adeegsiga Hantida Qaranka Ololaha Xisbiyada	431
<b><u>QAYBTA SADEXAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIJOOYINKA DOORASHOYINKA &amp; BARNAAMIJYADA DAWLADA:</b>	
13) SOOMA BIXIN	
<b><u>QAYBTA AFRAAD:</u> GO'AANADA MAAMUL &amp; QARAARADA:</b>	
14) SOOMA BIXIN	
<b><u>QAYBTA SHANAAD:</u> AMARADA, OGEYSIISYADA &amp; QANDARAASYADA DOWLADA:</b>	
15) Diiwaan Gelin Shirikada Al Na'ema Livestock Trading CO <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	433
16) Diiwaan Gelin Shirikada Sandos Clinic and Pharmacy. <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	434
17) Diiwaan Gelin Shirikada Global Healthcare Diagnostics <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	435
18) Diiwaan Gelin Dhidib Mining Company <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	437
19) Diiwaan Gelin Shirikada Mohamed Osman Trading <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	438
20) Diiwaan Gelin Shirikada Sana International Private LTD <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	440
21) Diiwaan Gelin Shirikada Sagal Mining Company LTD <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	441

22) Diiwaan Gelin Shirikada Advance Energy Services, <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	443
23) Diiwaan Gelin Shirikada Al-Fardows Home Decoration <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	444
24) Diiwaan Gelin Shirikada Auto Care Logistics LLC <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	445
25) Diiwaan Gelin Shirikada Som-Gulf General Trading Company LTD, <b><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></b>	447



**QAYBTA LABAAD:**

**XEER MADAXWEYNE:**



**REPUBLIC OF**



**SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-5026/092017

DATE....10/09/17

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0848/092017**


**Beddel**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey; Ahmiyadda ay Guddoomiyayaasha Gobolladu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo in isku beddel lagu sameeyo jagooyinkan hoos ku xusan;
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidooda, aqoontooda iyo hufnaantooda shaqo;
- Markuu Ku Qancay: In ay hanan karaan xilalkan loo magacaabay;

**Wuxuu Go'aansaday in laga bilaabo taariikhda Xeerkan**

In Mudane, Mustafe Cabdi Ciise (Mustafe Shiine), uu ahaado Guddoomiyaha Gobolka Maroodijeex ee Jamhuuriyadda Somaliland.



In Mudane, Cabdillaahi Jibriil Gaaxnuug (Buraale), uu ahaado Guddoomiyaha Gobolka Awdal ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**  
**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-5027/092017

DATE....10/09/17

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0849/092017**

**Beddel**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad,  
Xarafka (Kh) ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey:

Ahmiyadda ay Dekeduhu u  
leeyihiin dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay; In baahi loo qabo buuxinta  
jagada Maareeyaha Hay'adda  
Dekedaha Somaliland;

Markuu La Tashaday: Madaxda ay Khusaysa;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo  
hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo  
magacaabay;

### **Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Siciid Xasan Cabdillahi, laga bilaabo taariikhda  
manta uu ahaado Maareeyaha Hay'adda Dekedaha  
Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**



**SOMALILAND**

## **THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-5028/092017

DATE....10/09/17

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0850/092017**

**Beddel**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad faqradiisa (3) aad, Xarafka (kh) ee Dastuurka jamhuuriyada Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Hay'adda Ka hor-tagga Aafooyinka Dabiiciga ahi (NERAD) u leeyahay dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Maareeyaha Hay'adda Ka hor-tagga Aafooyinka Dabiiciga ah ee (NERAD);
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay khusayso;
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

### **Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Axmed Yuusuf Dirir, laga bilaabo taariikhda maanta ay ahaato Maareeyaha Hay'adda Ka hor-tagga Aafooyinka Dabiiciga ah ee (NERAD) ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

XEER MADAXWEYNE Lr: 0851/092017



## Beddel

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka jamhuuriyada Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay La-taliyeyaasha Madaxweynuhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo magacaabidda jagada La Taliyaha Madaxweynaha ee Arrimaha Abaaraha iyo Ka Hor-tagga Aafooyinka Dabiiciga ah;
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartideeda, aqoonteeda iyo hufnaanteeda shaqo;
- Markuu Ku Qancay: Xeer ay hanan karto xilkan loo magacaabay;

### Wuxuu soo Saaray Cafiskan

In Marwo, Maxamed Muuse Cawaale, laga bilaabo taariikhda maanta ay ahaato La Taliyaha Madaxweynaha ee Arrimaha Abaaraha iyo Ka Hor-tagga Aafooyinka Dabiiciga.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-5033/092017

DATE....16/09/17

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0852/092017**

**Cafis Madaxweyne**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xubintiisa 5aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qoraalka codsiga ah ee ay soo gudbisay Yurub Maxmed Cabdi;

Markuu La Tashaday: Masuuliyiinta ay arrintani khusayso

Markuu Ku Qancay: Qodobka 149aad ee Xeerka Ciqaabta Guud;

**Wuxuu Go'aansaday**

In laga bilaabo taariikhda maanta uu cafis gaar ahaaneed u fidiyo Yurub Maxamed Cabdi (Yurub Geenyo), oo qaranimada Somaliland ka soo hor-jeeday in muddo ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-5038/092017

DATE....19/09/17

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0853/092017**

**Magacaabid**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka u leedahay Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Maareeyaha Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka ee FCA (Food Coordination Agency) ee Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Ku Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay: In uu hanan xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Cali Diiriye Axmed (Maalin-tacab), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeyaha Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka (Food Coordination Agency) ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



**REPUBLIC OF  SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-5053/092017

DATE....26/09/17

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0854/092017**

**Magacaabid Degmo**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad iyo Qodobka 109aad, Faqradiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;


Markuu Arkay: Qodobka 10aad ee Xeerka Gobollada iyo Degmooyinka oo tilmaamaya wax-ka-beddelidda Qaab-dhismeedka Dalka;

Markuu Tixgeliyey: Codsiyada ka yimid Madax-dhaqmeedyada, Waxgaradka, Culimada iyo Odayaasha Deegaanka;

Markuu Tixgeliyey: Baahida loo qabo in Degmada Nasiye loo magacaabo Degmo Cusub;

Markuu Dhegeystay:

Soo jeedinta Wasiirka  
Wasaaradda Arrimaha Gudaha,



**Wuxuu go'aansaday**

In uu Nasiye u magacaabo Degmo, taasi oo ka tirsanaan doonta Gobolka Togdheer.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF  SOMALILAND**  
**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-5054/092017

DATE....26/09/17

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0855/092017**

**Magacaabid Degmo**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad iyo Qodobka  
109aad, Faqradiisa 3aad ee  
Dastuurka Jamhuuriyadda  
Somaliland;

Markuu Arkay:

Qodobka 10aad ee Xeerka  
Gobollada iyo Degmooyinka oo  
tilmaamaya wax-ka-beddelidda  
Qaab-dhismeedka Dalka;

Markuu Tixgeliyey: Codsiyada ka yimid Madax-  
dhaqmeedyada, Waxgaradka,  
Culimada iyo Odayaasha  
Deegaanka;

Markuu Tixgeliyey: Baahida loo qabo in Degmada  
Bohol loo magacaabo Degmo  
Cusub;

Markuu Dhegeystay: Soo jeedinta Wasiirka  
Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

### **Wuxuu go'aansaday**

In uu Bohol u magacaabo Degmo, taasi oo ka tirsanaan doonta  
Gobolka Sool.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

## **THE PRESIDENT**

JSL/P/WM/222-5060/092017

DATE....30/09/17

Ku: Golaha Wasiirrada JSL  
Ku: Guddoomiyeyaasha Gobollada JSL  
Ku: Taliyayaasha Ciidammada  
Ku: Guddoomiyeyaasha Degmooyinka JSL  
Ku: Madaxda Hay'adaha Madaxa Bannaan

Hargeysa  
Xarumahooda  
Xarumahooda  
Xarumahooda  
Xarumahooda

**Ujeeddo: Wareegto Madaxweyne; Gacan Siin Komishanka Doorashooyinka Qaranka**



Mudanayaal,

Sida aynu wada ognahay, waxa dalka ku soo fool leh Doorashada Madaxtooyada oo u qorshayan 13-ka November, 2017-ka. Sidaa darted, idinka oo gudanaya waajibaadka iyo masuuliyadda aad qaranka u haysaan, waxa la idin farayaa in aad ka gacan siisaan Komishanka Doorashooyinka Qaranka gudashada waajibaadka qaranka ee ku aaddan qabsoomidda doorashada Madaxtooyada, idinka oo raacaya shuruucda iyo xeerarka Dalka u dejisan.

Waxaan mar labaad, idinku adkaynayaa in aad gacan buuxda ka siisaan Komishanka heerarkiisa kala duduwan ee qaran, gobol, degmo iyo goob kasta, kana digtoonaataan wax kasta oo u muuqan kara fara-gelin, una diyaarisan goobaha ay u baahan yihiin sida Dugsiyada, Xannaanooyinka, Goobaha Dawladda ee ay u baahdaan.

Guddoomiyeyaasha Gobollada iyo Taliyeyaasha Ciidammada Qaranka, waxa si gaar ah loo farayaa in ay ka gacan siiyaan Komishanka heer Gobol, heer Degmo iyo heer goobeedba, hawlaha nabadgelyada iyo xasilinta amniga, muddada doorashadu socoto ka hor iyo kadib, iyaga oo ahmiyad weyn iska saaraya arrimaha keeni karaya nabad-gelyo darrada.

Allaa Mahad Leh,

**Axmed Maxamed Silanyo**  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**



JSL/M/WM/222-5061/092017

DATE....30/09/17

**Ku: Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Wacyigelinta**  
**Ku: Guddoomiyeyaasha Gobollada iyo Degmooyinka JSL**  
**Og: Komishanka Doorashooyinka Qaranka**  
**Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha**

**Hargeysa**  
**Xarumahooda**  
**Hargeysa**  
**Hargeysa**

**Ujeedo: Wareegto Madaxweyne; Isticmaalka Warbaahinta Dawladda iyo Fagaarayaasha Wakhtiga Ololaha Doorashada**


Mudanayaal,

Sida aynu wada ognahay, waxa dalka ku soo fool leh Doorashada Madaxtooyada oo ku muddaysan 13<sup>-ka</sup> November, 2017<sup>-ka</sup>. Sidaa darted, aniga oo ka duulaya Qodobka 26aad ee Xeer Lr. 20-2/2005, iyo Xeerka Hab-dhaqanka ee xisbiyada oo faraya in Xisbiyada oo faraya in xisbiyada Qaranka u sinnaadaan muddada ololaha doorashada isticmaalka warbaahinta dawladda iyo fagaarayaasha khayriyadda.

Waxaan idin farayaa, idinkuna adkaynayaa in loo sinnaado muddada baahinta (hawo kujiridda) ee Idaacada Hargeysa, TV-ga Qaranka iyo Wargeysyada Dawladda, isla markaana si isku mid ah loo adeegsado fagaarayaasha khayriyadda ee gobollada iyo degmooyinka dalka.

Waxaan mar labaad, idin farayaa in aad dhaqan gelisaan shaxda qoondaynta ololaha ee saddexda xisbi qaran iyo

sii deynta barnaamijyada ololaha doorashada ee ay soo saarayaan komishanka Doorashooyinka, si loo helo in dalka ay ka qabsoonto doorosho xor iyo xalaal ah oo loo siman yahay.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF**  **SOMALILAND**  
**THE PRESIDENT**

JSL/M/WM/222-5062/092017

DATE....30/09/17

Ku: Golaha Wasiirrada JSL

Ku: Guddoomiyeyaasha Gobollada JSL

Ku: Guddoomiyeyaasha Degmooyinka JSL

Ku: Madaxda Hay'adaha Dawladda ee Madaxa Bannaan

Og: Komishanka Doorashooyinka Qaranka

Hargeysa

Xarumahooda

Xarumahooda

Xarumahooda

Hargeysa

Ujeeddo: Wareegto Madaxweyne; Reebbanaanta U Adeegsiga Hantida Qaranka Ololaha Xisbiyada

Mudanayaal,

Sida aynu wada ognahay, waxa dalka ku soo fool leh Doorashada Madaxtooyada oo u qorshaysan 13<sup>-ka</sup> November, 2017<sup>-ka</sup>. Sidaa darted, waxa reebban in hantida qaranka nooc kasta oo ay tahay ba in loo adeegsado ololaha doorashada ee axsaabka qaranku ay ku loolamayaan.



Waxa kale oo reebban in shaqaalaha Dawladda, Saraakiisha iyo Xubnaha Ciidamada ee kala duduwani, in ay galaan ololaha doorashada ee axsaabta qaranka.

Waxaan rajaynayaa in amarkaasi oo sidiisa u fulo. Cid kasta oo baal martana waxa laga qaadi doonaa tallaabo ku habboon oo sharciga waafaqsan.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**QAYBTA SHANAAD:**  
**AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:**

**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL**

XIG/JSL/338/2017.

10/09/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, AL NA'EMA LIVESTOCK TRADING CO.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliye.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan yahay shirkada magaceedu yahay **AL NA'EMA LIVESTOCK TRADING CO, Astaanteeduna tahay:** (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Dhoofinta Xoolaha (Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 10/09/2017.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL**

XIG/JSL/343/2017.

13/09/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargaysa

**Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, SANDOS CLINIC AND PHARMACY.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliye.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **SANDOS CLINIC AND PHARMACY COMPANY LTD: -Astaanteeduna tahay:** - (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta Iyo Dhoofinta (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 13/09/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL**

XIG/JSL/344/2017.

13/09/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, GLOBAL HEALTHCARE DIAGNOSTICS, Oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

### **Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan yahay shirkada magaceedu yahay **GLOBAL HEALTHCARE DIAGNOSTICS, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta Qalalbka Caafimaadka iyo shaybaadhka (Import and Laboratory Services), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 13/09/2017.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.



**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL**

XIG/JSL/246/2017.

16/09/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargeysa.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, DHIDIB MINING COMPANY, Oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somliland Company law.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, Saamiyadooduna Ay Sugan Yihiin.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer  
Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.**



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **DHIDIB MINING COMPANY, Astaanteeduna tahay: -(Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta iyo Dhoofinta (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 16/09/2017**

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**

XIG/JSL/347/2017.

17/09/2017

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, MOHAMED OSMAN TRADING.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **MOHAMED OSMAN TRADING, Astaanteeduna tahay**:(Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Dhoofinta Saliida Dabiciga ah (Natural Oil Processing and Product), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 17/09/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**



**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL**



XIG/JSL/348/2017.

16/09/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargaysa

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay SANA INTERNATIONAL PRIVATE LTD, Oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somliland Company law.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **SANA INTERNATIONAL PRIVATE LTD, Astaanteeduna tahay:** (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Dhoofinta macdanta (Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 17/09/2017.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

**JAMHUURIYADDA**  **SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL**

XIG/JSL/349/2017.

16/09/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda magaceedu SAGAL MINING COMPAN LTD, yahay, Oo ay

ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somliland Company law.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, Saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

### **Wuxuu Diiwan Geliye.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan yahay shirkada magaceedu yahay **SAGAL MINING COMPANY LTD, Astaanteeduna tahay:** - (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Dhoofinta Macdanta (Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysaa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 17/09/2017.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL**

XIG/JSL/350/2017.

17/09/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargaysa

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, ADVANCE ENERGY SERVICE.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliye.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **ADVANCE ENERGY SERVICE: -Astaanteeduna tahay:** - (Magaca Shirkada),

shaqadeeduna tahay Rakibida, Samaynta xagaajinta Qalabka Solarta (Installation, Maintenance and Repair Service), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 17/09/2017



Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL**

XIG/JSL/352/2017.

20/09/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, AL-FARDOWS HOME DECORATION.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer

NO.25/2004 Company Act of  
Somaliland.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu  
saxeexay sida uu qabo qodobka  
11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer  
Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan yahay  
shirkada magaceedu yahay **AL-FARDAWS HOME  
DECORATION, Astaanteeduna tahy:-** (Magaca  
Shirkada), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta (Import),  
xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo  
maanta oo ay taariikhdu tahay 20/09/2017.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA  SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL**

XIG/JSL/353/2017.

20/09/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Hargeysa.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda  
Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, AUTO CARE LOGISTICS LLC.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

### **Wuxuu Diiwan Geliyey.**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **AUTO CARE LOGISTICS LLC, Astaanteeduna tahay:-**(Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Rarista iyo Dejinta (Clearance and Forwarding), xarunteeduna tahay Magaaladda Berbera, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 20/09/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**


**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

**JAMHUURIYADDA**



**SOMALILAND**

**XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD**



XIG/JSL/355/2017.

24/09/2017

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

**Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed**

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay:** - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SOM-GULF GENERAL TRADING COMPANY LTD, Oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkadu, sida ku cad qodobadka 11aad(2)(a) Somaliland company law.

**Markuu Arkay:** - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:** - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka



11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer  
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y



Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay  
Shirkada magaceedu yahay **SOM-GULF GENERAL  
TRADING COMPANY LTD Astaanteeduna tahay:-**  
(Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta  
Allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda  
Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay  
24/09/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**